

Miisaaniyadda 2023: Xooginta adeegyada caafimaadka

Feb. 28, 2023

Miisaaniyadda 2023 waxay xaqiijinaysa mustaqbalka Alberta iyada oo sare u qaadaysa hannaanka adeegyada caafimaadka.

Dowladda Alberta ayaa maalgelintii ugu badnayd abid oo dhan 24.5 bilyan ku samaynaysa khasnadda hawlaha Wasaaradda Caafimaadka sanadkan, taas oo ka badan 4.1 boqolkiiba sanadkii hore. Lacagta dheeriga ah ayaa lagu kabi doonaa arrimaha hortabinta leh ee Qorshe Hawleedka Daryeelka Caafimaadka si loo horumariyo adeegyada caafimaad ee dadka Alberta.

Miisaaniyadda 2023 waxay u qoondeysay 3.1 bilyan dhismaha, ballaarinta iyo dayactirka xarumaha. Waxaa ka mid ah maalgelinta Isbitaal Goboleedka Red Deer, si loo badiyo adeegyada muhiimka ah ee isbitaallada ugu waaweyn Alberta. Lacag ayaa sidoo kale ku bixi doonta mashaariic sida Isbitaalka Carruurta Stollery ee Edmonton, Xarunta Caafimaadka Gobolka ee North Calgary/Airdrie, ballaarinta Strathcona Community Hospital, iyo xarumo cusub ama la bilay oo ku yaalla Bassano, Cardston, iyo Whitecourt.

Miisaaniyadda 2023 waxaa ku jira 158 milyan oo 2023-24 lagu soo jiidanayo shaqaale caafimaad oo dheeri ah, oo ay ku jiraan dhakhaatiir iyo kalkaalisoooyin.

“Tani waa maalgalintii ugu badnayd ee daryeelka caafimaadka,” ayuu yiri Jason Copping, Wasiirka Caafimaadka Dowladda Alberta.

Miisaaniyadda 2023 waxaa sidoo kale bilaabanaya koror saddex sano ah oo dhan \$211 milyan si loo horumariyo waqtiga ambalaastu ku timaaddo.

Si loo kobciyo caafimaadka aasaasiga, dowladda Alberta waxay ku maalgelinaysaa in ka badan \$2 bilyan 2023-24.

Macluumaad la xiriira

[Alberta.ca/Budget](https://alberta.ca/Budget)

Su'aalaha Saxaafadda

Charlotte Taillon

charlotte.taillon@gov.ab.ca

780-932-5381

Xoghayaha Saxaafadda,

Guddiga Maaliyadda iyo Lacagta

“Marka aynu kordhinno tayada daryeelka caafimaadka, waxaan xaqiijin karnaa in nidaamkeenna daryeelka caafimaadku daboolo baahida muwaaddiniinteena,” ayuu yiri Travis Toews, Wasiirka Maaliyadda Dowladda Alberta.

Miisaaniyadda 2023 waxaa ku jira in ku dhow 4.3 bilyan oo ah ku talagalka taageerada hawlaha Daryeelka Bulshada, Daryeelka Joogtada iyo barnaamijyada haysmada, oo ah koror ka badan 15% sanadkii hore.

Saddex sano gudahood, dowladda Alberta waxay ku maalgelin doontaa \$155 milyan dhismaha adeegyo muddo dheer socda ee ka soo kabashada maandooriyaha.